

KUDHAQAN XAFIIS D.



Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIIKA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, Tr. 15 Maajo 1974

L. 1 R L. 5

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee-ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin, lambar waliba — **RUKUNKA:** sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 13, Tr. 2 Maajo 1974 — *Toosin Sharciga Kirada* Bog. 235
LAW No. 14 of 4 May 1974 — *Law on the unification of*
Agency fees and Commissions of the newly Established
Somali Shipping Agency. » 235

BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 21 Febrayo 1974, L. 41 — *Ogolaasho*
heshiis dhexmaray Dawladda Somaliyeed iyo Shirkadda
ELF - SOMALIE. » 237

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 21 Febrayo 1974, L. 42 — *Ogolaasho*
heshiis dhexmaray Dawladda Somaliyeed iyo Shirkad-
daha Burmah Oil Somalia Limited, Adobe Africa incor-
porated, Home Oil Company Limited, A. S. Maersk Oil
exploration, Maersk Olieudvinging A. S. Petrola Inter-
national Trading & Shipping Corporation, of Panama
Tricentol Limited. » 238

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-

CAANKA, Tr. 13 Abril 1974, L. 43 — *Xeerka Guddiga af Soomaliga.*

Bog. 239

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-

CAANKA, Tr. 1 Maajo 1974, L. 44 — *Shaqo ka joojin Gaashaanle Saciid Niur Faarax.*

» 242

BOGGA SEDEEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddaladda
Dhul Jaalle Evengelisti Sandro. (99)

» 244

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddaladda
Dhul Jaalle Aaden Nuur Dirir. (100)

» 244

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Baddaladda
Dhul Jaalle Maxamed Cumar Afrax iyo Maxamed Faarax Maxamed. (101)

» 245

DEGMADA KISAMANIYO, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle
Maxamed Xassan Maxamuud. (102)

» 245

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY BAYDHABO, Ogeysiis
Dhumida Buugga L. 1163, Jaalle Maxamed Ibrahim
Ismacil. (103)

» 246

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Ogeysiis Dhumid
Jeega Wareega L. 091053, Jaalle Cisman Xasan
Ismail. (104)

» 246

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, Ogeysiis Dhumid
Jeega Wareega L. 4798, Jaalle Ismacil Axmed Maxamed. (105)

» 247

SHARIKADDA A.M.E.Co. S.p.A. Muqdisho, Ogeysiis —
Isuimaatin Guudnimo oo caadi ah. (106)

» 247

SHARCI L. 13, Tr. 2 Maaajo 1974.

Toosin Sharciga Kirada Guryaha.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO RAACAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo in la hagaajiyo gefka ku soo baxay Sharciga kirada guryaha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka soo socda:

1. Qodobka 14aad (1) ee Sharciga Kirada Guryaha ee Lam. 44, ee soo baxay 27kii Noofember, 1973 waxa lagu beddelayaa ka soo socda:

«Every District Revolutionary Council in Mogadishu and each other District Revolutionary Council in the Republic shall constitute itself as a Rent Control Commission, and shall examine and hear any application against the decision of the Quarter Arbitration Sub-Committee concerning any dispute in respect of tenancy between a lessor and a tenant».

2. Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka; waxaana lagu soo saari doonaa Faa-finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Marso 1974.

Jaalle Sarreeyey Gaas Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

LAW No. 14 of 4 May 1974.

Law on the unification of Agency fees and Commissions of the newly Establishment Somali Shipping Agency.

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

TAKING NOTE Of the Joint Session of the Supreme Revolutionary Council and the Council of Secretaries of State to nationalize all Private Agencies and create a Somali Shipping Agency;

TAKINK NOTTE Of the Deliberation of the Supreme Revolutionary Council and Council of Secretaries of State of 25th April 1974, regarding the Unification of Agency Fees and Commissions (Vide letter XGX-23-31-S-74 dated 27th April 1974);

CONSIDERING The urgent necessity to establish uniform rates on fees and Commissions;

HEREBY PROMULGATES

the following Law:

Article 1

Agency Fees

All Agency fees on various vessels calling at the Ports of the Somali Democratic Republic shall be charged, according to the following categories:

- | | | | |
|-----|------------------|-------|---------------------------------|
| (a) | Somali Shillings | 2,000 | on a Tanker per call. |
| (b) | » | » | 1,500 on a cargo ship per call. |
| (c) | » | » | 800 on a Naval ship per call. |
| (d) | » | » | 600 on a Fishing Boat per call. |

Article 2

Commission fees

All Commission fees on freight and passengers shall be charged at the following rates:

- | | | | |
|-----|----|-----------------|-------------------------------------|
| (a) | 2% | (two percent) | on in-ward freight. |
| (b) | 5% | (five percent) | on out-ward freight. |
| (c) | 7% | (seven percent) | on passenger's booking formalities. |

Article 3

Delivery order Fees

A fee on delivery order shall be charged at the following rates:

- | | | | |
|-----|------------------|------|--|
| (a) | Somali Shillings | 2.50 | on in-ward cargo per cubic meter. |
| (b) | » | » | 4.00 on out-ward cargo per cubic meter or on freight, whichever ever is greater. |

Article 4

Loading fees on Livestock

A fee on loading of Livestock shall be charged at the following rates:

- | | | |
|----------------------|---|-------------------------|
| (a) Camels | — | Shs. So. 1.50 per head. |
| (b) Cattle | — | Shs. So. 1.50 per head. |
| (c) Sheeps and Goats | — | Shs. So. 0.30 per head. |

Article 5

Alteration on Commission and Fees

The Director General of the Agency is hereby empowered to reduce or increase the rates of Commission on freight and fees, from time to time, whenever it deems essential, from the Commercial point of view, and view of promoting business activities of the Agency.

Article 6

Entry into force

This law shall enter into force, on the date of its publication in the Official Bulletin.

Muqdisho, 4 Maajo 1974.

Major General Mohamed Siyad Barre
PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council

XEER' MADA XWEYNAAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

21 Febraayo 1974, L. 41.

Ogolaasho heshiis dhexmaray Dawladda Somaliyeed iyo Shirkadda
ELF-SOMALIE.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqaddii Xeerka ahayd ee 1aad ee Kacaankii

21kii Oktoobar, 1969 iyo Xeerkaa 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiskii 27kii Agosto 1973 oo dhexmaray
Dawladda Somaliyeed iyo Shirkadda ELF-SOMALIE;

MARKUU ARKAY Dooddii ku dhexmartay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha fadhigoodii wada jirka ahaa ee 19kii Juulaay 1973;

TALADII UU SOO JEEDIYAY Xoghayaha Dawladda, Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

WUXUU XEEREYNAYAA

Qodob Qura

1. Heshiiskii 27kii Agosto 1973 dhexmaray Dawladda Somaliyeed iyo Shirkadda ELF-SOMALIE oo ku saabsanaa in meelo ka mid ah dalka Soomaaliyeed laga sahamiyo, laga baaro lagama soo saaro Saliida Macdanta ah ayaa halkan lagu ogolaaday.

2. Xeerkan waa in lagu faafiyaa faafinta rasmigaa ah. Muqdisho, 21 Febrayo 1974.

Sareeye Gaas Moxamed Siyad Barre

GODDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Moxamed Buraale Ismaaciil

Xoghayaha Dawladda

Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 50.

Mogadiscio, li 16 Aprile 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR.

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

21 Febrayo 1974, L. 42.

Ogolaasho heshiis dhexmaray Dawladda Somaliyeed iyo Shirkadaha Burmah Oil Somalia Limited, Adobe Africa Incorporated, Home Oil Company Limited, A. S. Maersk Oil Exploration, Maersk Oliendvinging, A. S. Petrola International Trading & Shipping Corporation of Panama Tricentrol Limited.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqaddii Xeerka ahayd ee 1aad ee Kacaankii Oktoobar 1969 iyo Xeerii 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiskii 10kii Diisambar 1973 oo dhexmaray Dawladda Soomaaliyeed iyo Shirkadaha kor ku qoran.

MARKUU ARKAY Dooddii dhexmartay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Galaha Xoghayayaasha fadhigoodii wada jirka ahaa ee 19kii Juulaay 1973;

TALADII UU SOO JEEDIYAY Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

WUXUU XEEREYNAYAA

Qodob Qura

1. Heshiiskii 10kii Diisambar 1973 dhexmaray Dowladda Soomaaliyeed iyo Shirkadaha Burmah Oil Somalia Limited, Adobe Africa Incorporated, Home Oil Company Limited, A. S. Maersk Oil Exploration, Maersk Oileudvinging A. S., Petrola International Trading & Shipping Corporation of Panama, Tricentrol Limited oo ku saabsanaa in meelo ka mid ah dalka Soomaaliyeed laga sahamiyo, laga baaro lagana soo saaro saliida Macdanta ah ayaa halkan lagu ogolaaday.

2. Xeerkan waa in lagu faafiyaa faafinta rasmiga ah.
Muqdisho, 21 Febrayo 1974.

Sareeye Gaas Moxamed Siyad Barre
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Moxamed Buraale Ismaaciil
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 51.

Mogadiscio, li 16 Aprile 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

13 Abril 1974, L. 43.

Xeerka Guddiga af Soomaaliga.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
MADAXWEYNAHA G. S. EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaashidii 1aad ee Kacaanka;
ISAGA OO ARKAY Xaashidii 2aad ee Kacaanka;
ISAGA OO TIXGELINAYA baahida loo Iqabo habeynta hawlaha
Guddiga af Soomaaliga;

WUXUU GUDDOMIYEEY

Qodobka 1aad

Sharcigan, haddii ulajeeddadu wax ka duwan ayan sheegiyn;
«Xoghayaha Dawladda» waa Xoghayaha Dawladda ee Hiddaha iyo
Taccliinta Sare.

«Guudi» waa Guddiga Af Soomaaliga.
«Agaasima Guud» waa Agaasimaha Guud ee Akadeemiyada Dhaqanka.

Qodobka 2aad

Guudi Af Soomaali oo ka hoos shaqeyna Akadeemiyada baa la dhisayaa.

Qodobka 3aad

1. Guddigu wuxuu ka koobmayaa:
 - a) Xubinta Fulinta u qaybsan oo tiradeedu toddoba qof tahay;
 - b) Xubinta Xeeldheerayaal (Experts) oo ka koobanta 15 qof;
 - t) Xubinta Lataliyaal oo toban qof ah.

Qodobka 4aad

Xubinta Fulinta waa tan joogtada ah ee wadda Guddiga hawlihiisa ee xil weyni ka saaran yahay meel marinta go'aamada iyo amimaha maalin walba joogtada ah ee Guddiga.

Qodobka 5aad

Xubinta Xeeldheerayaasha oo lagu tilmaamay qodobka 3aad qaybta (b) ee xeerkan waxaa loo xulayaa laamaha cilmiga ee kala duwan sida gaar ahaan loogu kala xeeldheer yahay, wuxuuna gooni ahaan isaga xil-saarayaa baaris iyo ka-talin laamaha u kala gaarka ah, qofba gooni ahaan ugu go'ay.

Qodobka 6aad

Xubinta Lataliyaasha ee lagu xusay qodobka 3aad qaybtiisa (t) ee xeerkan waxay ahaanaysaa meel-dayeen lagu noqdo oo xil ka saaran yahay isku hawla qeexidda iyo aruurinta murtida Soomaaliyeed oo lagu tiraabo iyo xil kastoo gaar ahaan loo saaro.

Qodobka 7aad

1. Xubinta Fulinta iyo tan Xeeldheerayaashu waxa shirkoodu ahaanayaa hadba sidii iyo goortii loo baahdo; waxaana madax shirkooda ka noqonaya Guddoomshaha Guddiga.

2. Guddigu shir buuxa oo loo idil yahay buu sannadkii laba goor isugu imanayaa waxaana guddoonshe ka noqonaya Agaasimaha Guud.

3. Agaasimaha Guud shir dheeraad ah wuu isugu yeeri karaa haddii loo baahdo.

Qodobka 8aad

1. Hawlaha Guddigu waxay noqon doonaan inuu si habboon u dhexgalo oo una baaro horumarinta Af Soomaaliga iyo dhan walba, sidaa awgeed wuxuu:

- a) talooyin ka soo jeedinayaa, dushana ka ilaalinayaa-sida Shar-cigu tilmaamayo-oreh iyo qoraalba wixii lagu faafinayo Af Soomaaliga siiba hawlaha suugaanta (literary).
- b) Faafinta oo fidinayaa, monografyo, sheekooyin, qaamuusyo, buugag naxwa ah iyo maansooyin u urursan ama uu aruuriyo.
- t) Qaab qura oo rasmi ah oo la raaco u yeelayaa erayada, iyo qoristooda.
- j) Ka bixinayaa talo farshamo (technical) iyo/ama tu xirfo (Professional) xagga qorista meerisiyada dugsiyada (tex books) horumarinta barnaamijka waxrashada (curriculu development) iyo xogaabida guud ee Af Soomaaliga.
- x) Goobayaa oo aruurinayaa oo haynayaa, iyadoo qoran, gabayada, maansada iyo suugaan Soomaali oo idil ay ka mid yihiin wixii Af iyo Hiddo iyo Dhaqan ah oo qiimo ku fadhiya.

2. Fuliyo wixii hawlo kale ah oo uu u xilsaaro qobod kastoo lagu dejiyo xeer kastoo kale.

Qodobka 9aad

1. Guddigu wuxuu lahaanayaa Guddoomiye oo uu magacaabo Xoghayaha Dawladdu.

2. Guddoomiuhu waxaa la doonayaa inuu ahaado: (a) qof heerka aqoontiisu gaariisan tahay tu cilmi sare ah una dhiganta maqaankiisa. (b) ku tilmaaman oo loogyahay oo aan la duri karin hawlaha uu dalka u qabtay; (t) magac ku leh bulshada abwaannada iyo aqoonyahannada.

Qodobka 10aad

1. Guddoomiyaha ama/iyo Guddiga waxaa fulinta hawlaha ku kaalinaya Xoghayn ka kooban ciidan intii loo baahdo gaara.

2. Xoghayntaa waxaa magacaabaya Agaasimaha Guud oo la tashada Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 11aad

Xubnaha Guddiga waxaa dikreeto ku magacaamaya Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 12aad

Xoghayaha Dawladdu wuxuu awood u leeyahay inuu beddelo *Guddoomiyaha* ama qof kastoo kale oo ka tirsan guddiga oo uu u garto inuusan si wacan u fulin hawlaha xeerkani u xilsaaray.

Qodobka 13aad

Gunnada Xubnaha ka tirsan Guddiga waxaa xeer ku goynaya Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 14aad

Guddoon ama xeer ksta oo aan la socon ama kaba horjeeda xeerkan waa mid dhaqan beelay oo buray.

Qodobka 15aad

Xeerkani horuu degdeg ugu dhaqan gelayaa.

Muqdisho, 13 Abril 1974.

Sarreeye Gaas Maxmed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA G. S. K.

Maxamad Aaden Sheekh
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare

KEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
1 Maayo 1974, L. 44.
Shaqo ka Joojin — Gaashaanle Saciid Nuur Faarax.

MADAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kawaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 19aad Xarafka (e) iyo Qodobka 32aad ee Qaynuunkii Lambar 2 ee 4-1-73 kuna xiriirsan sharciga Lambar 2 ee 2-12-1972 ee Dhismaha Ciidanka Boliiska;

ISAGOO ARKAY Qodobka 12aad ee Sharciga Lambar 6 ee 31-12-69 ee ku saabsan Xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Qalabka sida (Pension and Gratuity);

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Baliisku kuna soo sheeqay warqadiisii PF/41 ee 28-4-1974;

ISAGOO AQOONSADAY Inuu Sarkaalka hoos ku qooran shaqada laga saaro Kacaanka awgiis;

ISAGOO DHEGAYSTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

WUXUU AMRAY

Qodobka 1

In Gaashaanle Saciid Nuur Faarax shaqada laga saaro marka laga bilaabo 1-5-74 Kacaandiid awgiis.

Qodobka 2

Sarkaalkaasi wuxuu yelan doonaa wixii xaq ah ee uu siinayo Sharciga lambar 6 ee xaqa iyo abaalgudka ee Ciidamada Qalabka Sida.

Qodobka 3

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu dhigi doonaa faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Maayo 1974.

Sx. S. Gaas Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Sx. S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax
Xoghayaha Dawladda Arrimaha Gudaha
VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 154.
Mogadiscio, 4 Maggio 1974.
Il Sostituto Magistrato ai Conti:
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Evangelisti Sandro kuna yaal

Muqdisho, Xafadda Hodan — T. G. N. 767-62.

Jaalaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Hodan, kuna fadhiya 900 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 545972 ee 1-9-1962; waxay isku baddashay sida soo socota:

Dulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda Hodan Jdka Qaranka, waxuuna leeyahay qiyaas Rektangular, oo ku fadhiya 30x35 = 1.050 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Waxa ka xiga Jabhadda Xoreeynta Xeebta Soomaaliyeed;
Koofur Waxa ka xiga Guriga labarkiisu yahay ZB. 6-699;
Galeed Waxa ka xiga Moxamed Ismaciil;
Bari Waxa ka xiga Jidka Qaranka.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(99)

Moxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Aaden Nuur Dirir kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Wardiigley — T. G. N. 1201-57.

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna fadhiya 1290 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud dhulkaas qaarkiis.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 1013010 ee 21-6-60, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusub wuxuu ku yaal Muqdisho, Xaafadda Wardigley waxuuna leeyahay qiyaas afar gees ah addimihiisuna yihiin 30x30 kuna fadhiya 900 mdh.

SOODHIN

Waqooyi: Waxaa ka xiga Xseen Cilm Barkhadle.
Koofur: Waxaa ka xiga Maxamed Saalax Ladane.
Galbed: Waxaa ka xiga Caamir Tarmumi.
Bari: Waxaa ka xiga Jid.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(100)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Maxamed Cumar Afrax iyo Maxamed Faarax Maxamad kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Centrale del Latte — T. G. N. 1261-62.

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xaafadda kor ku qoran, kuna fadhiya 2709 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadoo hore ee lagu soo diray warqadi tiradeedu ahayd 548599 ee 20 Nofember 1962, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusub wuxuu ku yaal Muqdisho, Xaafadda 21 Oktoobar waxuuna leeyahay qiyaas rektangular ah addimihiisuna yihiin 40x30 kuna fadhiya 1200 mdh.

SOODHIN

Waqooyi: Waxaa ka xiga Cabdulqaadir Shirwao Yuusuf.

Koofur: Waxaa ka xiga Jid.

Galbeed: Waxaa ka xiga Jid.

Bari: Waxaa ka xiga Xaaji Abuukac Xaaji Faarax.

(101)

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

DEGMADA KISMMANIYO

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaxan Maxamuud maallintii 6-6-1964 uu keenay dagmadatan arji uu ku weydiisanayay in la siiyo dhul dhismo dawladeed oo ku yaal degmada Kismaanyo meel u daaw jidka Afmadow esxan qofkii dammeeynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal xafiiska legmadatan.

Dhulkaasi wuxuu ku fadhiyaa 243,95 mdh. oo iskuwareeg ah wa xaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta lagu naadshay buuga xerka Dawladda, laguna dhejiye derbiga loogu tala galay oo dagmada Kismaayo egeysiiskeeda.

Kismaaniyo, 26-4-1965.

(102)

Guddomiyaha Degmada
Mahdi Cabdi Cali

MAXKAMADDA GOBOLKA — BAYDHABO

Markii aan arkay weydiyinta uu soo qortay Jaalle Moxamed Ibrahim Ismacil ee aan ogaaday in ay tahay shaqada Xafiiskan markaan arkay qodobada 69 D. D. 9-9-65 L. 2;

Waxaa cad dhumidda buugga Lamb. 1163 ay ku tiil lacag tiradeedu tahay 3720 Shilin (saddexkuntodobaboqollabaatan) Bangiga Keydinta iyo amaahda Laanta Baydhabo, waxaa amrayaa in loo cusbooneysiyo mar labaad bugaas ninka la yiraahdo Moxamed Ibrahim Ismacil, muddo 30 beri ah oo ka bilaabato markii lagu dhigo Xeerka Faafinta rasmiga ah, haddii aan la helin qof kale oo sheegta.

Bangigaas waxaa loo caddeynayaa in buugga gacanta laga saaro ninka magaciisa kor ku qorayahay ama qof ka sita wakaalad cad asagoo la sugyo 30ka beri.

Baydhabo, 29-3-1974.

Gudoomiyaha Maxkamadda
Dr. Cabdi Muse Mayow

(103)

MAXKAMADDA GOBOLKA — HARGEISA

15kii Abril 1974.

CISMAN XASAN ISMAACIL — Arjileh

iyo

BANKIGA GANACSIGA SOOMALIYED

Laanta Hargeisa — Dood celiye

DIGRII

Cisman Xasan Ismaciil wuu I hor yimi isaga oo ah ninka haystey Jeega wareega Lamberkiisu yahay 091053, Taarikhdiisu ahayd 1 Abril 1974, oo ku qoran yahay lacag dhan So. Sh. 4,880/- (Afarkunsideedboqol iyo sideetan Shilin).

Waxaanu i tusay warqadii Maamulaha Bankiga Ganacsiga, Laanta Hargeysa u ku cadeeyey in jeeg wareega ka lumay.

Waxaan halkan ku bixinaya amarka aniga oo cuskanaya Qodobka 27 ee Xeerka Lamberkisu yahay 2 ee 9kii Sebtember 1965, Jeega wareega Lamberkisu yahay, 091053 in la baabiyo.

Waxaa amar ku bixinaya:

(a) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah;

(b) Lacagta ah So. Sh. 4,880/- Bankiga u celiyo Arjilaha 30 Casho dabadeed marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Ka soo baxday Gacanteyda iyo Shaabadda Maxkamadda Maanta 15kii Abril 1974.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka
Xasan Xaaji Yuusuf

(104)

MAXKAMADDA GOBOLKA — XAMAR

Naddan arkay weydiinta Ismaciil Axmed Maxamed iyo Warqadda Bankiga Kaydinta iyo Amaahada iyo qodobka 69 D. L. 1965 L. 2;

Waxaacad dhumiida jeedga wareega L. 4798 Sh. So. 10,000/- Tobankun.

Waxaa la amaryaa in loo cusbooneysiyo jeeggaas mar labaad laguna dhigo Boolettino Ufficiale lana sugo muddo 15 (Shaniyotoban) beriah oo laga bilaabo marki lagu qoro bolettiinada waana in gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof wakaalad sax ah ka ahaysta Ayadoo la sugaayo mudadaas kor ku dhigan.

Muqdisho, 11-5-1974.

Guddoomiyaha M. Gobolka Xamar
W. S. Dr. Yaasin Shire Faarax

(105)

SHIRKADDA A.M.E.Co. S.p.A. — MUQDISHO

ISUIMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka ku jirah Sharkadda A.M.E.Co. waxaa la weydiisanayaa in eey ka soo qeybgalaan shir guudnimo oo caadi oo lagu qaban doono xafiiska Sharikadda bisha june 27keeda 1974 saacaddu markeey tahay 5ta galabnimo si looga hadlo waxyaalaha hoos ku yaala:

1. — Xogwarankii maamulayaasha kuna saabsana sharikada shaqadeedii 1973.
2. — Xogwarankii illaliyaasha xisaabatka sharikadda kuna saabsana sanadkii 1973.
3. — Aqbaliddi la ogolaan laha faaiido iyo khasaaro, sanadkii 1973.
4. — Doorasho maamulayaal cusub iyo illalayaal cusub oo xisaabiyaal ah.
5. — Wixii kale oo hadal u baahan, haddi la waayo tiradii loo baahna maalinta hore, waxa lagu qaban doona shir labaad isla xafiiska sharikadda maalinta bisha June 30ka saacadduna 5ta galabnimo, ayada oo laga hadli doono qodobada shanta ah oo kor ku qoran.

Muqdisho, 7-5-1974.

Madaxda Maamulayaasha
Yusuf Nur Xassan

(106)